IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH
الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho 12 Febbraayo 1982 L. 1R2

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100

Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. balkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER SHARCI L. 1 ee 28 Jen. 1982, Cafis Guud loo fidiyey Dembilayaal. Bog: 152

XEER SHARCI L. 2 ee 28 Jen. 1982, Baabi'inta canshuurta aan caadiga ahayn ee horumarinta dhaqaalaha. 155

XEER MADDAXWEYNAHA JDS, L. 7 ee 28 Jen. 1982, Billad Maar ah ee Hawlkarnimo lagu maamusay J.L. Maxamed Sh. Xuseen. 157

WAKAALADDA M. QARANKA

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 8 ee 28 Jen. 1982, Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu maamusay J.L. Faarax Xirsi Baare. 158

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 9 ee 1 Jen. 1982, Magacaabid Sarkaal loo wakiishay kharashkan Miisaaniyadda sannadka 1982. 159

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 3.2.82, Lumid Jeeg War. L. 361326 ku qoran Saciid Maxamed Faarax L. 86 161

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 3.2.82, Lumid Jeeg. War. L. 353191 ku qoran Cabduraxmaan Aw-Nuur Cabdi L. 87 163

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.1.82, Lumid Buug Keyd L. 2233/NCR-9434 ku qoran Afjanno Guuleed Ducaale L. 88 164

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.1.82, Dumid Buug Keyd L. 11178 ku qoran Maxamed Xasan Rooble L. 89 165

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10 Feb. 1982 Lumid Buug Keyd L. 12121 ku Cabdi Sheekh Cabdulle L. 90.— 166

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.2.82 Lumid Jeeg War. L. 285301 ku qoran Maxamed Cali Yuusuf L. 71.— » 167

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER-SHARCI lambar 1 taariikh 28 Jen. 1982, Cafis guud loo fidiyey dembilayaal iyo eedeysanayaal Dalka dibeddiisa jira iyo kuwo caddaaladda ka dhuumaaleysanaya.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: go'aannadii Kalfadhagii 4aad ee Golaha Dhexe Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, qaybtooda ku saabsan cafis u fidinta dadka Dalka dembiga ka galay ee dibedda ku nool, ama ka dhuumaaleysanaya caddaaladda;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda go'aanna daas, lagama maarmaanna ay ugu muuqatay in dhaqangelintooda lagu soo saaro XEER-SHARCI si ay degdeg ugu hirgalaan;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA-SHARCI ee soo socda:

Qod. 1aad

Qof kasta oo Soomaali ah oo Qaranka Soomaaliyeed dembi ka galay, inta ka horreysa 24ka Jennaayo 1982, kuna nool Dalka JDS dibaddiisa, ha xukunnaado ama yuusan xukunnaanine, waxaa loo fidiyey cafis, haddii uu oofiyo shuruudaha ku tilmaaman Qod. 4aad.

Qod. 2aad

Sidoo kale, isla cafiskaasi waxaa loo fidiyey dembiilayaasha iyo eedeysanayaasha caddaaladda ka dhuumaaleysanaya, oo jooga Dalka gudihiisa.

Qod. 3aad

Cafiskaasi ku tilmaaman Qod. 1aad wuxuu qofka aan xukunneen ka tirtirayaa dembiga, kan xukumanna wuxuu ka baabi'inayaa ciqaabta.

Qod: 4aad

Qofka cafiskaasi ka faa'iideysanaya, waa in uu la yimaadaa shuruudaha soo socda:

1: Haddii uu jiro Dalka dibeddiisa:

a) inuu Dalka JDS ku soo noqdaa saddex bilood gudahooda, laga soo billaabo 24ka Jennaayo 1982, iskana xaadiriyo mar allaaliye markuu soo galo, saldhigga ama xarunta ugu dhow ee Hey'adaha Nabadgelyada, ama xafiisyada Xeer Ilaaliyayaasha, si loo sugo taariikhda ku soo laabashadiisa Dalka, loona qaado tillaabada sharciga ah ee la xiriirta dhaqangelinta cafiska, ama:

b) iska xaadiriyo muddada kor ku tilmaaman gudaheeda, Safaaradaha JDS, isagoo qoraal cafis weydiisasho ah geynaya.

2. Haddii uu dembiilaha ama eedeysanuhu ku sugan yahay Dalka gudihiisa, inuu iska xaadiriyo Hay'adda Nabadgelyada ugu dhow ama Madaxa Degmada.

Qod. 5aad

Safaaradaha, Hay'adaha Nabadgelyada iyo Madaxda Degmooyinku waa in ay degdeg ugu gudbiyaan Xeer Ilaalinta awoodda u leh magacyada Dadka isku xaadiriyey in ay cafiskan ka faa'iideystaan, soona raaciyaan warbixin qof-qof ah, iyagoo sheegaya magaca qofka oo saddexan, magaca hooyada, meel iyo taariikh dhalasho, dembiga uu ku xukuman yahay ama ku eedeysan yahay, goobta uu dembigu ka dhacay iyo taariikhdiisa iyo taariikhda uu is xaadiriyey.

Qod. 6aad

Xeer Ilaaliyaha awoodda u leh dhaqaajinta dacwaddii loo haystay ka-faa'iideystaha cafiska ku tilmaaman Qodobbada 1aad iyo 2aad ee Xeer-Sharcigan, ama Ku-xigeennada ama Wakiillada Xeer Ilaaliyaha ee Go-

bollada iyo Degmooyinku, waxay u hawlgelayaan soo saaridda go'aannnada dembi tirtiridda ama ciqaab baabi'inta, hadba xaalka uu ku sugan yahay Ka-fiia'iideystuhu.

Qod. 7aad

Xeerkan-sharci wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 24ka Jennaayo 1982, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 28 Jen. 1982

MADAXWEDNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER SHARCI lambar 2 taariikh 28 Jan. 1982 Baabi'inta canshuurta aan caadiga ahayn ee horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKU UARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 57 ee 27ka setembar 1970, kuna saabsan canshuurta aan caadiga ahayn ee horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada;

MARKUU TIXG)LIYEY: in ay lagama maarmaan tahay in la baabi'iyo canshuurtaas, iyadoo loo daneynayo Xoogsatada mushaar ku noolka ah, lagana taakuleynayo xagga maciishadda;

ISAGOO TIXGELIYEY: soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

DHEGEYSTAYNA Golaha Wasiirrada

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA-SHARCI ee soo socda:

Qod. 1aad

Laga billaabo 1da feberaayo 1982, waxaa la baabi'iyey canshuurta aan caadiga ahayn ee horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada.

Qod. 2aad

Isla taariikhda ku tilmaaman Qod. 1aad, waxaa la burriyey Sharciga tirsigiisu yahay 57 ee 27ka September 1970, iyo Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 3aad

1. Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

2. Isla markaana, iyadoo lagu dhaqmayo Qod. 69aad ee Dastuurka, waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 28 Jen. 1982

MADAXWEDNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 7 ee 28 Jen. 1982 Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu maamusay Jaalle Maxamed Sheekh Xuseen.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 65 ee 19ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Muddadii dheereed ee Jaallahaas uu soo shaqeeyey, isagoo muujiyey inuu Qaranka ugu shaqeeyo si hagar la'aan ah, waajibaadkiisana ku guto si xilkasnimo ah oo aan leex leexad lahayn;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyo hawlkarnimada, kana qayb qaata dhismaha Dalka iyagoo muujinaaya niyadsami, kacaannimo, looga reebo raad wax ku ool ah.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodob keliya

Maxaa lagu maamusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo Jaalle Maxamed Sheekh Xuseen, oo ka tirsanaan jiray shaqaalaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ee Gobolka Mudug.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho 28 Jan. 1982

MADAXWEDNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 8 ee 28 Jen. 1982, Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu maamusay Jaalle Faarax Xirsi Barre.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 65 ee 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasiirku-xigeenka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, kuna saabsanayd wax qabadka iyo xilkasnimada dheeraadka ah ee Jaalle Faarax Xirsi Barre, oo kaalin wax ku ool ah ka qaatay gurmadkii daryeelka iyo daaweynta xoolaha dadkii ka soo qaxay gumeysiga xabashada;

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in Jaallahaas la guddoonsiiyo aqoonsiga uu Kacaankiisa iyo Ummaddiisa ka mudan yahay, loogana reebo raad wax ku ool ah, dhaxal gal ah.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodb keliya

Waxaa lagu maamusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo Jaalle Faarax Xirsi Barre, Isuduwaha Wasaaradda X. Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ee Gobolka Gedo.

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 1 Jen. 1982

MADAXWEDNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 9 ee 1 Jen. 1982, Magacaabid Sarkaal loo wakiishay kharashkan Miisaaniyadda Sannadka 1982.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad xubintiisa 14aad ee Dastuurka JDS;

MARKAAN ARKAY: Dikreetada sharciga ee soo baxday 29kii Disembar 1961, L. 2, Amarka Maamulka xisaabaadka;

MARKAAN ARKAY: P.D.R. 20 Marso 1965, L. 13 xeerka nidaaminta iyo abaabulidda xeerka joogtada ah ee ku saabsan Madaxtooyadii hore ee Guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriiray iyo wixii beddelaad gashay;

MARKII LA GAREYSTAY: In loo baahanyahay sarkaal shaqaale ee loo wakiisho Maamulka Lacagta Madaxtooyada JDS. iyo dhammaan xubnaha kale duwan ee raacsan: Agaasimayaasha Guud- Xafiisyada, iyo qaybaha maamulka ee lagu tilmaamay sharcigii lambarkiisu ahaa 1 taariikhdiisuna ahayd 4.1.1968, ayadoo uu siinayo awood maamulidda qardaysiga ku tala gelidda kharashka shaqo socodsiinta, iskuduwidda iyo soo bandhigidda xisaabaadka la garaysan karo kuna saabsan qaradada (soo hormarin) la sameeyo oggolaanshada rukhsadda safarka dibadda iyo gudahaba.

DIKREETA:

Sarkaal la yiraahdo Jaalle Maxamed Xaaji Cabdi «Fartaag» — Darajo A5/° Agaasimaha Guud ee Lacagta M.J.D.S. waxaa lagu magacaabay sarkaal wakiileed kharashka Miisaaniyadda Sannadka ee Lacagta MJDS iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay. ka billaabata 1da Jannaayo 1982.

Dikreetadatanu waxay dhaqan galeysaa haddatan, isla markaana waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Jen. 1982

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay.
Diiwaanka L. 1 bogga L. 1.
Muqdisho, 10 Jen. 1982.
Hantidhowraha Guud.
Dr. Xuseen Cabdulle Cali;

— Maxkamadda Gobolka W/Galbeed —

Cusbooneysiin Jeeg Wareeg ee lumay.-

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MARKUU ARKAY: Arjiga taariikhdiisu tahay 1.2.82, ee uu soo qortay Jaalle SICIID MAXAMED FAARAX, kuna saabsan cusbooneysiinta Jeegga Wareega ee ka lumay, lambarkiisuna yahay 361326, taariikh 24.12.81, Shs. 50.000/= oo laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, laanta 1aad ee Hargeysa;

MARKUU ARKAY: rasiidka jeeggii lumay iyo caddaynta Bankiga ee ay ku sugnaatay lahaanshaha lacagta ku qoran jeegga iyo samaynta rasmiga ah;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 — 70 ee Xeerka Lambar yahay 2, soona baxay 9.9.65, (Credit Instruments).

WUXUU GO'AAMIYEY

In la tirtiro Jeeggii lumay loono cusbooneysiiyo Jaalle SICIID MAXAMED FAARAX, gacantana laga saaro cusbooneysiinta Jeegga labaad isaga ama ciddii kale ee soo siiyo Wakaalad rasmi ah, 15 maalmood ka dib, maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

WAXAA LA FARAYAA

Bankiga u sameeyey jeeggii lumay Jaalle Siciid inuu mar kale u sameeyo cusbooneysiinta jeegga labaad, markii ay dhammaadaan shuruudaha baarista iyo faafintan ku qoran go'aanka.

WAXAA KALE

Oo la farayaa Bankiga Ganacsiga ee Hargeysa inuu ku dhejiyo irdaha Bankiga naqallada go'aankan si ay uga eegtaan halkaasi ciddii haysata kii lumay ama dankale ka lihi.

Codsadaha, waxaa la farayaa inuu deg deg u gaarsiiyo go'aanka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Jamhuuriyadda, laanta Faafinta Rasmiga ah iyo Bankiga Hargeysa si ay u fuliyaan amarrada go'aanka.

Hargeysa, 3.2.82

GUD. MAXKAMADDA GOBOLKA
(Ibraahim Faarax Maxamed)

KAALIYAHA MAXK. GOBOLKA
(Maxamed Diiriye Maxamed)

L. 86

— Maxkamadda Gobolka W/Galbeed —

Cusbooneysiin Jeeg Wareeg ee lumay.-

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MARKUU ARKAY: arjiga uu soo qoray Cabduraxmaan Aw-Nuur Cabdi oo ku taariikhaysan 1.2.82, kuna codsaday inloo cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee ka lumay, Lambarkiisuna yahay 353191, taariikh 19.12.81, laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco, lacagta ku qoranina tahay 50.000/= oo Shilin;

MARKUU ARKAY: Rasiidka Jeeggaasi lumay iyo Caddaynta Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta 1aad ee Hargeysa ee Caddaynaysa lahaanshaha dacwoodaha;

MARKUU ARKAY: Qod. 59 — 70 ee Xeerka Lamb. yahay 2, soona baxay 9.9.65 (Credit Instrument).

WUXUU GO'AAMIYEY

In la tirtiro jeegga lumay oo lambarkiisa iyo lacagtiisuba ay kor ku xusan yihiin, loona cusbooneysiiyo Jaalle Cabduraxmaan Jeegga kale oo la mid ah kii lumay.

WUXUU AMRAYAA

Bankiga Kaydka iyo Ganacsiga Soomaaliyeed laamihiisa Hargeysa, cusbooneysiinta Jeegga Labaad, gacanta ka saaraan Jaalle Cabduraxmaan Aw-Nuur 15 maalmood ka dib, maalinta go'aankan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

WAXAA LA FARAYAA

Jaalle Cabdiraxmaan in uu deg deg u gaarsiiyo naqallada go'aankan Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee JDS si ay ugu soo saaraan Faafinta.

WAXAALAFARAYAA

Laanta 1aad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka ee Hargeysa, inay ku dhejiyaan naqallaoda go'aankan

irdaha Bankiga si ciddii haysata kii lumay ay halkaas uga eegato.

Hargeysa, 3.2.82

GUD. MAXKAMADDA GOBOLKA
(Ibraahim Faarax Maxamed)

KAALIYAHA MAXK. GOBOLKA
(Maxamed Diiriye Maxamed)

L. 67

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran; lambarkiisu ahaa 2233/NCR-9434, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Shs. 11.728/= uu iskalahaa AFJANO GUULEED DUCAALE, sida ku cad warqadda lambar. yahay 203 taariikh 12.1.82, ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd lam. HADDU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.65. 2233/NCR-9434 oo ku qoran AFJANNO GUULEED DUCAALE, ayna ku jirto Shs. 11.728.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta laad u beddesho AFJANO GUULEED DUCAALE, Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muaadisho, 17.1.82

GUD. MAX. GOBOLKA BANAADIR

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 88

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADD UARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 11178, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qoran lacag dhan Shs. 5.645/= uu iska lahaa Maxamed Xasan Rooble sida ku cad warqadda lamb. yahay 7373 taariikh. 21.1.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buugga Keydka lam. 11178 oo ku qoran Maxamed Xasan Rooble ayna ku jirto Shs. 5.645/=;

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 1aad u baddelo Maxamed Xasan Rooble Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.1.82

GUD. MAX. GOBOLKA BANAADIR

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 89

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA M.G.B.

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lambarkiisu ahaa 12121, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh. So. 52.568 uu iska lahaa Cabdi Sheekh Cabdulle sida ku cad warqadda lamb. 00197 Taariikh 10.2.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lam. 12121 oo ku qoran Cabdi Sheekh Cabdulle ayna ku jirto Shs. 52.568/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad u baddelo Cabdi Sheekh Cabdulle Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib arkey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.2.82

GUDDOOMIYAHA M. G. B.

(W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 90

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA M.G.B.

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Inuu dhumay Jeegga Wareega Lambarkiisu ahaa 285301, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 20.000 uu iska lahaa Maxamed Cali Yuusuf sida ku cad warqadda Lambarkeedu ———— Taariikhdu 3.1.82, ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9 65.

WUXUU XEERIYEY

In la Qiimetiro (Amortamentto) Jeegga Wareega Lam. 285301 oo ku qoran magaca Maxamed Cali Yuusuf ayna ku jirto Sh. So. 20.000

WAXUU U FASAXAAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco in uu siiyo Maxamed Cali Yuusuf lacagta ku qoran Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman kaddib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 beri marka Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

WAXAA LA AMRAYAA

In Go'aan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee JDS, lana gaarsiiyo Laanta Burco ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 10.2.82

GUDDOOMIYAHA M. G. B.

(W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 91